



WASAARADDA ISGAARSIINTA IYO TIKNOOLAJIYADDA

Daah-furka Hay'adda Hawada Sare ee Afrika  
iyo Shirkii NewSpace Africa

The image shows an invitation card for the 'Official Inauguration Ceremony Of The African Space Agency'. The card features a green and gold header bar. Below it, the text 'Official Inauguration Ceremony Of The African Space Agency' is written in bold black font. To the right is the logo for 'AFSA' (African Space Agency). The central part of the card is a photograph of a modern building with a blue and white patterned facade, labeled 'AFRICAN SPACE AGENCY'. A large red ribbon graphic sweeps across the middle of the photo. At the bottom, there are four informational boxes: a location pin icon with 'African Space Agency Headquarters, Cairo, Egypt', a calendar icon with '20th April, 2025', a globe icon with the website URL '<https://africanspaceagency.org/inauguration/>', and a clock icon with '10:00am'.

Waaxda cirbixinta iyo Dayax-Gacmeedka

PREPARED BY MOHAMED ABUBAKAR ISMAIL

04/20/2025 Daahfurka Xarunta Hawada Sare Africa  
04/21-24/2025 Shirkii New Space Africa

# Hordhac



20-ka Abriil 2025, waxa Afrika u dhacay dhacdo taariikhi ah oo ahayd furitaanka rasmiga ah ee Hay'adda Hawada Sare ee Afrika (AfSA) intii lagu jiray shirkii NewSpace Africa oo ka dhacay magaalada Qaahira, Masar. Madax sare, wasiirro, safiro, iyo hogaamiyayaal caan ah oo caalami ah ayaa isugu yimid munaasabaddan si ay ugu dabaal-degaan horumarka Afrika ee hoggaaminta hawada sare.

Xafladdan waxay xoojisay ballanqaadka Afrika ee madax-bannaanida hawada sare, midnimada, hal-abuurka, iyo horumarka waara, waxayna AfSA u suurtagelisay inay noqoto hay'ad aasaasi u ah mustaqbalka sayniska, tignoolajiyada, iyo hal-abuurka Afrika.

## Ka-Qaybgalka Qaranka Soomaaliya iyo Fariimaha Heerka Sare

### Fariin ka timid Madaxweynaha Soomaaliya:

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, **Mudane Xasan Sheekh Maxamuud**, ayaa farriin diirran u diray dhammaan dalalka Afrika munaasabadda furitaanka Hay'adda Hawada Sare ee Afrika.



Madaxweynuhu wuxuu hambalyo u diray:

- **Dr. Tidiane Ouattara**, Madaxweynaha Golaha Hawada Sare ee Afrika, iyo xubnaha golaha, dadaalkooda iyo himiladooda.
- **Madaxweyne Abdel Fattah El-Sisi**, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Carabta ee Masar, taageerada uu siiyey Afrika iyo martigelinta xarunta AfSA, isagoo bixiyey saldhig rasmi ah oo lagu maamulo arrimaha hawada sare ee Afrika.

Madaxweynuhu wuxuu carabka ku adkeeyey in guushan ay tahay tallaabo weyn oo mideyn doonta rajada Afrika ee hoggaaminta hawada sare.

## Aqoonsiga Hoggaanka Qaranka

Madaxweynuhu sidoo kale wuxuu hambalyo u diray:

- **Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya iyo Wasiirka Isgaarsiinta iyo Tignoolajiyada** dadaalkooda ku aaddan aas-aasidda iyo horumarinta Barnaamijka Hawada Sare ee Qaranka Soomaaliya.
- **H.E, MP. Mohamed Adam Moalim Ali** (Wasiirkha Isgaarsiinta iyo Tignoolajiyada), oo u diray Agaasimaha Waaxda Hawada Sare iyo Satellite-ka, Mudane Maxamed Abuukar Ismaaciil, si uu si rasmi ah uga matalo Soomaaliya labadaba furitaanka AfSA iyo shirkii NewSpace Africa.



## Ka-Qaybgalka Wafdiga Soomaaliya



- Safaaradda Jamhuriyadda Dimoquraadiak ee Soomaaliyeed ee Masar iyo Mudane Maxamed Abuukar Ismaaciil, Agaasimaha Hawada Sare iyo Satellite-ka , ayaa si firfircoон uga qaybgalay labadaba furitaanka Hay'adda Hawada Sare ee Afrika iyo Shirka NewSpace Africa.
- Wasiirka Isgaarsiinta iyo Tignoolajiyada wuxuu si gaar ah ugu hambalyeyay Dr. Temidayo Oniosun iyo kooxdiiisa Space in Africa dadaalkooda wanaagsan ee ay ku qabteen shir heer caalami ah oo tayo sare leh.
- Wasiirkha wuxuu ballanqaaday in Soomaaliya si joogto ah uga qayb qaadan doonto sanad walba shirarka mustaqbalka ee NewSpace Africa.

Kulammo Heer Sare iyo Wada-Shaqeyn

1. Kulan gaar ah oo uu qabtay Dr. Tidiane Ouattara

H.E. Dr. Tidiane Ouattara, Madaxweynaha Golaha

Hawada Sare ee Afrika, ayaa qabtay kulan gaar ah oo uu la yeeshay Agaasimayaasha Guud ee Hay'adaha Hawada Sare iyo Wakiilada Barnaamijyada Hawada Sare ee Afrika gudaha Xarunta cusub ee AfSA.

Intii kulankaas socday:

Dr. Tidiane Ouattara wuxuu si kooban uga warbixiyay horumarka iyo muhiimadda AfSA.

Wuxuu si shakhsii ah ugu hambalyeeyay dhammaan wakiiladii ka yimid wadamada Afrika dadaalkooda xooggan.

Wuxuu ballan qaaday in uu si cadaalad ah, tayo leh oo hufan u hoggaamin doono horumarka hawada sare ee Afrika.



Sidoo kale Kulamada Agaasimaha Hawada Sare ee Soomaaliya Mudane Maxamed Abuukar Ismaaciil wuxuu sidoo kale yeeshay:

Kulamo kala duwan oo uu la yeeshay shirkado kala duwan oo ka qaybgalay Shirka NewSpace Africa, oo ku saabsanaa mustaqbalka iskaashiga iyo mashaariicda la xiriira Soomaaliya.



### **Kulamaddi Agaasime Hay'adda Kala Duwan:**

Kulamo kala duwan oo uu la yeeshay wakiillo ka socday Barnaamijyada Hawada Sare ee Afrika, kuwaas oo ay isla garteen muhiimadda wada-shaqeynta iyo midnimada Afrika si ay ugu guuleysato tartanka hawada sare ee caalamka.

## Ka-Qaybgalka Guddiyada Sare


### 23 Abriil 2025 – Agaasime Maxamed oo Warbixin Ka Bixiyey Shirka Hay'adaha Hawada Sare ee Afrika (Cohort 4)

Mudane Maxamed Abuukar Ismaaciil wuxuu ka qaybgalay guddigan oo ay sidoo kale ka mid ahaayeen:

- **Mr. Amin Mestar**, Xoghayaha Guud ee Hay'adda Hawada Sare ee Aljeeriya
- **Prof. Frederic Ouattara**, Wasiirkii hore ee Wasaaradda Tacliinta Sare, Burkina Faso
- **Dr. Doreen Agaba**, Hoggaamiyaha Farsamada, Waaxda Hawada Sare iyo Cilmiga Cirbixinta, STI Secretariat, Uganda

Mudane Maxamed wuxuu soo bandhigay:

- Himilada Barnaamijka Hawada Sare ee Qaranka Soomaaliya
- Horumarka lagu sameeyay dhisidda kaabayaal asaasiga ah ee hawada sare ee Soomaaliya
- Dadaallada socda ee qorista Siyaasadda Hawada Sare ee Soomaaliya iyo Istiraatiijiyado la xiriira
- Qorshayaasha lagu horumarinayo awoodda aadanaha, tababarka injineerrada iyo cilmi-baarayaasha Soomaaliyeed
- Is-dhexgalka jaamacadaha Soomaaliyeed ee cilmi-baarista hawada sare iyo hal-abuurka.





## 24 Abriil 2025 – Guddi Sare oo Lagaga Dooday: "Albaabka Afrika ee Hawada Sare: Sahaminta Fursadaha Horumarinta Goobaha Dayax-Gacmeedka"

Mudane Maxamed Abuukar Ismaaciil wuxuu sidoo kale ka qaybgalay dood sare oo uu dhex-dhexaadinyay **Mr. Samuel Nyangi** (Space in Africa), waxaana sidoo kale ka qaybgalay:

- **Brigadier Hillary Kipkosgey**, Ku-simaha Agaasimaha Guud ee Hay'adda Hawada Sare ee Kenya
- **Prof. Jean Pitot**, Injineer ka tirsan Machadka Cilmi-baarista Nidaamyada Hawada Sare (ASRI)



Mudane Maxamed wuxuu xoogga saaray:

- Himilada horumarinta xarumo dayax-gacmeed oo Afrika ah, oo Soomaaliya ka mid tahay dalalka xiiseynaya arrintan.
- Ahmiyadda istiraatijiyyadeed ee horumarinta goobaha dayax-gacmeedka, si Afrika uga noqoto mid madax-bannaan oo hormuud u ah dhaqaalaha caalamiga ah ee hawada sare.
- Sida dayuurinta dayax-gacmeedyada laga sameeyo Afrika ay u dhimi karto kharashaadka, u yareyn karto ku tiirsanaanta xarumaha shisheeye, kana qayb qaadan karto is-maamulista teknologiyadda Afrika..

# Gunaanad

Ka-qaybgalka Soomaaliya ee Furitaanka Hay'adda Hawada Sare ee Afrika iyo Shirka NewSpace Africa 2025 wuxuu caddeeyey sida Soomaaliya uga go'an tahay ka qaybgalka, horumarinta, iyo hormuudnimada deegaanka sayniska iyo tiknoolajiyada ee Afrika.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Ra'iisul Wasaaraha, iyo Wasiirka Isgaarsiinta iyo Tignoolajiyada, waxay muujiyeen taageeradooda buuxda ee dadaallada lagu horumarinayo Barnaamijka Hawada Sare ee Qaranka Soomaaliya. Agaasimaha Hawada Sare iyo Dayax-gGacmeedka, Mudane Maxamed Abuukar Ismaaciil, ayaa si sharaf leh u matalay Soomaaliya, isaga oo si qoto dheer uga qayb qaataay shirarka heerka sare, kulammada wadatashiga, iyo doodaha muhiimka ah ee lagu xusay aragtida, horumarka, iyo baahida iskaashi ee Afrika.

Soomaaliya waxay markale ballanqaad daysay inay sii xoojin doonto ka-qaybgalka hawlaha hawada sare, iyadoo xoogga saaraysa:

- Dhisidda kaabayaal horumarsan oo hawada sare ah
- Horumarinta siyaasadaha iyo shuruucda qaran ee hawada sare
- Kordhinta tababarada iyo horumarinta xirfadaha injineerrada iyo khubarada Soomaaliyeed
- Xoojinta iskaashiga jaamacadaha iyo xarumaha cilmi-baarista
- Ka qaybqaadashada mashaariicda iyo hindisayaasha caalamiga ah ee hawada sare

Soomaaliya waxay ka go'an tahay inay noqoto xubin firfircoон oo kaalin muuqata ku leh horumarinta Hawada Sare ee Afrika, iyada oo door muuqda ka qaadanaysa horumarka mustaqbalka ee deegaanka sayniska, tiknoolajiyada, iyo hal-abuurka.






# Somalia's National Space Program - Progress & Vision

Department of Space and Satellite,  
Ministry of Communication and  
Technology, Somalia

Presented by Mr. Mohamed Abubakar Ismail

Director of Space and Satellite, Ministry of Communication and  
Technology, Somalia





# Establishment of the Department

- Department was officially established in 2023 under the Ministry of Communication and Technology.
- The department was mandated to build Somalia's capabilities in satellite technology, space sciences, and international partnerships.

The goal was to ensure that Somalia is not left behind in the Fourth Industrial Revolution, particularly in the space sector.

# Why Space Matters for Somalia

- In many places, space investment is driven by competition, profit, or power. In Somalia, it is driven by survival and sustainability.
  - Space technology helps us monitor and manage climate-related risks—especially flooding and droughts that affect millions.
  - It supports precision agriculture, helping farmers optimize crop yields in our fertile regions.
- It enables real-time surveillance of our
- maritime domain, where illegal fishing and resource theft continue to harm our economy.



# Why Space Matters for Somalia

- Satellite imagery is crucial for border security, environmental monitoring, and disaster preparedness.
- For us, space exploration is not just a frontier—it is a tool for development and tool can save Somalia into path to global inclusion.
- Somalia is also focusing the importance of orbital resource management.
- For us, space exploration is not just a frontier—it is a tool for development and a path to global inclusion.



# Strategic Objectives

---


Mandated to developing legal and regulatory frameworks.

Building foundational infrastructure.

Empowering academic institutions universities and researchers to take part in scientific exploration and innovation.

Somalia's private sector engagement

International Cooperation



# Capacity Building and Talent Development

- We began national recruitment campaigns to attract Somali engineers, scientists, and IT professionals to the space sector.
- A core priority is human capital: training individuals capable of designing, operating, and maintaining space systems.
- We have established partnerships with friendly nations to facilitate scholarships and short-term technical training.
- Our vision is to create a new generation of Somali experts who can lead not just nationally, but regionally.

Scholarship Opportunity – UNOOSA/Japan Cooperation

Technical Training – AfDev-Sat Training Programme with EGSA

Strengthening Local Academic Institutions – SIMAD University & Somali National University.

# Private Sector and Academic Engagement

- The Ministry actively engaged Somalia's private sector, recognizing that public-private partnerships are key to innovation.
- Dalcom, led by the visionary Eng. Jama, became the first Somali company to invest significantly in space-related technologies.
- Through this collaboration, we've supported innovation hubs and research centers within universities.
- Academic institutions are contributing to research, satellite data analysis, and STEM outreach for youth across the country.




**Dalkom Connecting Somalia  
to the World**

# International Cooperation

- Turkey government remains Somalia's most consistent and action-oriented space partner. Their support includes training, planning, and infrastructure.
- We are advancing strategic collaborations with Egypt's EGSA, ISA and the China government for knowledge exchange and technical assistance.

These partnerships can open doors for joint missions, academic exchanges, and shared R&D projects.

Somalia welcomes new bilateral and multilateral collaborations to accelerate the pace of our space development.



# Vision for the Future

- Somalia aims to build an inclusive, peaceful, and self-reliant space program with regional relevance.
- We envision establishment of launching base and launching our own satellite missions with the help of trusted partners.
- We will continue investing in knowledge systems, digital innovation, and public awareness.

Our long-term goal is to contribute meaningfully to African space science and become a hub of cooperation in East Africa.



# Call to Action

- We invite governments, agencies, and private entities to collaborate with us.
- Somalia is open for partnerships in research, education, industry, and exploration.

Let's turn space into a shared platform for

- opportunity, knowledge, and resilience across Africa

Together, we can shape a future where no

- African country is left behind.



# Questions & Discussion

